

SOMALI VOICE OF NEW ERA, PROGRAM NO 1060
THRU THE BIBLE SERIES
THE BOOK OF AMOS 7:9-8:1-2

Halkani waa raadiyo Transworld oo idinku soo dhowaynaya barnaamij tafsiiir ah oo soconaya muddo nusa-saac ah. Waxaana barnaamijkan Codka Waayaha Cusub ee waxbaridda ah idiin soo diyaariya Masiixiyiin Soomaali ah, waxaana laga maqlaa barnaamijkan habeenka Isniinta ilaa iyo habeenka jimcaha, saacaddu markay tahay 7:25ka fiidnimo, mawjadda 31ka miterband.

OPENING SINGNATURE TUNE UP 25 SEC. AND UNDER.

Mar kale ayaannu dhegaysatayaal idinku soo dhowaynayaa barnaamijka, waxaannu horey idiinku sii wadaynaa daraasaadka aynu ka soo xiganayno kitaabka qoduuska ah ee aynu ugu magac-darnay, **"Dhex-marka Kitaabka Qoduuska ah."**

Waa barnaamij aad ku baranaysaan kutubta Babaylku uu ka kooban yahay, haddii ay ahaan lahaayeen kuwii Axdigii Hore iyo kuwa Axdiga Cusub. Waxaannu horey idiinku sii wadaynaa dhegaystayaal casharradii aynu ka soo xiganaynay kitaabkii Caamoos oo ahaa nin Ilaah farriin ugu soo dhiibay boqortooyadii woqooyi xilli ay ku baraareen hawlahooda, laakiin haddana ay Ilaah ka dheeraadeen.

Caamoos ma ahayn nin la mid ah culimadii waxbaratay ee wakhtigiisa, wuxuuse ahaa nin uu ka dhex shaqaynayay Ruuxa Qoduuska ah ee Ilaah. Mar uu la hadlayey Dadka reer binu Israa'iil ayaa nebigu wuxuu iyaga garansiinayaa waxa ku soo socda oo ah in magaalada la burburin doono. Wuxuuse u sii sheegayaa in dembiyadooda aawadood Ilaah burburin doono magaalada Beytal.

Intiise aan burburku ku dhicin qaranka ayaa waxaa dadkii lagu wargelinayaa inay Ilaah u soo leexdaan si bal wax un uga badbaadaan. Waxyaabaha nebigu kula hadlayo reer binu Israa'iil waa waxyaabo caam ah oo khuseeya qaran waliba.

Wuxuuna leeyahay, sida ku qoran kitaabkii Caamoos 5:14-15, waxaana nebiga uu leeyahay, iyadoo Ruuxa Qoduuska ahi ka dul hadlayo, **"Wanaagga doondoona, sharkase ha doondoona, aad noolaataane, oo sidaasuu Rabbiga ah Ilaaha Ciidammadu idiinla jiri doonaa sidaad u tidhaahdeen. Sharka nebcaada, oo wanaaggajecclaada, oo caddaalad iridda ku sameeya, waayo, waxaa suurtoowda in Rabbiga ah Ilaah aciidammadu uu u roonaado kuwa reer Yuusuf ka hadhay."**

SONG: REEL----CUT-----

Markii noogu dambaysay dhegaystayaal waxay inoo joogtay xadhigga qiyaasta ee Caamoos ka hadlay, taasoo meelo badan oo qorniinka ah looga hadlay. Waxaa looga hadlay sidaadaannu horey idiinku soo sheegay, kitaabkii Ishacyaah, Yeremyaah iyo weliba Yexesqeel. Waxaa kaloo lagu soo sheegay kitaabkii Sekeryaah.

Marka xarigga qiyaastu wuxuu ka macne yahay in Ilaah uu xukun saari doono dadka Waxaa nebi Daanyeelna xarigga qiyaasta uu inoogu sheegayaa 5:27, waxaana qorniinka qoduuska ahi leeyahay qayb ahaan sidatan: **"....Kafadaha waa lagugu miisaamay oo wax baa kaa dhinnaaday."** Markii Ilaah bilaabo inuu wax miisaamo, ayaa waxaa xaqiiqo noqonaysa in shuruudihiisii laga soo bixi waayey, waxaana marka uu wax miisaamayo uu maanka ku hayaa ciqaab. Haddaba Daanyeel wuxuu istaajiyey inuu dadka u sii

hadlo oo u duceeyo, waayo wuxuu gartay in caqaabtu ay lagama maarmaan tahay. Haddaan horey idiinku sii wadno meeriska cutubak 7aad ayaannu imminkana idiin akhriyeynaa aayadda 9aad oo ah tan aynu caawya meeriska cutubka ka bilaabayno. Waxaana qorniinka goduuska ah leeyahay sidatan:

"Oo meelaha sare ee reer Isxaaq cidla way noqon doonaan, oo meelaha goduuska ah ee dalka Israa'iina way baabi'i doonaan, oo anna reer Yaaraabcaam seef baan kula kici doonaa."

Marka dhanka kale laga eego, Ilaah wuxuu leeyahay Yaaraabcaan ma nasan doono, ama nabad heli maayo, waayo waa qaynuun Ilaah horey u dejiyey oo wuxuu leeyahay, sidaannu ku soo aragnay kitaabkii Ishacyaah, **"Kuwa sharka leh nabadi uma jirto."** Nin waliba oo shar leh wuu shidan yahay, oo wax baa gubaya, wuxuuna doonayaa inuu belaayo sameeyo mar waliba.

Waxaa markaa imminka Ilaah inoo sheegayaa in kuwa sharka leh aanay nabadi u jiri doonin. Yaaraabcaamna wuxuu ka mid noqday kuwa sharka leh waayo dadkii Ilaah ayuu ku khasbay inay weyl dahab ah caabudaa. Haddaan intaas kaga baxno tusniinta iyo muuqaallada nebiga loo muujiyey, ayaannu haatanna isla eegaynaa maaddada khusaysa:

**KHIBRADIHII NEBIGA LA SOO GUDBOONAADAY
AMA UU LA KULMAY.**

Waxaynu kala soo dhex baxnay tusniintii hore, waxyaabo taariikhi ah, waana khibrado nebi Caamoos uu arkay. Waxaan haddaba qaybahan ku soo qaatay horu-dhicii kitaabka, waana waxyaabo khuseeya qisada. Haddaan markaas horey idiinku wado meeriska oo isla eegno waxyaalihii nebigu tusniinta kala soo

baxay ayaannu idiin akhriyeynaa baalka 1148 ee Axdigii Hore 7:10-11. Waxaana qorniinku leeyahay sidatan:

"Markaasaa Amasyaah oo ahaa wadaadkii Beytel fartiin u diray Yaaraabcaam oo ahaa boqorkii dalka Israa'iil, oo wuxuu ku yidhi, Caamoos sirqool buu kuugu dhigay dadka Israa'iil dhexdooda, oo dadka dhulkana erayadiisa ood han ma qaadi karaan. Waayo, Caamoos wuxuu leeyahay, Yaaraabcaam seef buu ku dhimanayaa, oo dadka Israa'iilna sida xaqiiqda ah maxaabiis ahaan waa looga kaxaysanayaa dalkooda."

Ilaa iyo wakhti ayuu Amasyaah aamusnaa, laakiin imminka waxay la tahay inuu caddaymo ku filan oo uu nebiga uga takhalusi karo. Haddiise aad dib ugu noqoto aayadda 9aad, waxaad arkayaa in Amasyaah uu nebiga ka been sheegay. Waxaa aayaddii sagaalaad ee cutubka toddobaad ay leedahay:

"Oo meelaha sare ee reer Isxaaq cidla way noqon doonaan, oo meela qoduuska ah ee dalka Israa'liina way baabi'i doonaan, oo anna reerka Yaaraabcaam seef baan kula kici doonaa."

Balse waxaad ogaanaysaa in nebigu uu si caadi ah u hadlayey, oo uu lahaa waxaa Yaaraabcaam ku badanaya dagaallada, oo xasillooni darro ayaa waddanka qabsanaysa.

Balse Camasyaah ayaa si xun hadalkii u dhigay, oo wax caam ahaa ayuu ka dhigay wax hal qof looga soo hor-jeedo. Dadkii oodhan way dembaabeen, waxaana taas ku eedaysan quruunta oo dhan. Waxaan garanayaa kuwo badan oo dadka kaga been sheega Masiixa, iyadoo dantooduna ay tahay inay hor-istaagaan farriinta caamka ah ee Injiilka.

Waa farriin anfaca iyo waxtar u leh insaanka meel

waliba oo ay joogaan, waxaana akhbaarkan iska leh dadka dunida isla sida laynoogu sheegayo Injiilka sida Luukos u qoray 2:10-14, markaasoo malaa'igtii Rabbigu ay la kulanto Arijirro oo waxaa Qorniinku leeyahay sidatan:

"Markaasaa malaa'igtii ku tidhi, Ha baqina, waayo ogaada, waxaan idiin keenay war wanaagsan oo leh farxad weyn oo u ahaan dadka oo dhan. Waayo, maanta waxaa magaalada Daa'uud idiinku dhashay Badbaadiye oo ah Masiixa Rabbiga ah. Oo waxaa calaamo idiin ahaan tan, waxaad heli doontana ilmo maro ku duudduuban oo ku jiira qabaal. Dhaqsoba waxaa malaa'igtii la jirtay guuto fara badan oo jannada ka timid, wayna ammaanayeen Ilaah oo lahaayeen, Ilaah ha ku ammaanmo meela ugu sarreeya, Xagga dhulkana nabad ha ahaato dadka ka farxiya Ilaah dhexdooda."

Isla sida Soomaali badan oo weliba aan garasho u lahayn kitaabka ay uga hor-imaadsan yihiin wacdiska Injiilka. Waxaanay masiixyiinta Akhbaarka Wanaagsan ku wacdiya dadka u abuuraan xiisado daran iyo dhibaatooyin. Mase oga dhibka ay Masiixa kala kulmi doonaan markii dadka oo dhan ay ka hor-muuqdaan. Waayo Masiixa qudhiisaa leh, **"Waxaa amar laygu siiyey dunida iyo samada."**

Masiixu wuxuu leeyahay amar. Waxaa haddaba kuwaas la mid ah ninkan Amasyaah ah, oo ka baqaya in dadku ay ku gedoodaan isaga iyo dalladda culimada ee dalka, kuwaasoo ku guuldarraystay inay dadka dariiqa Rabbiga ku hoggaamiyaan. Amasyaah wuxuu ku dirdirayaa Caamoos boqorka. Haddaba Caamoos wuxuu yiri oo keliya, **"...Oo reerka Yaaraabcaam seef baan kula kici doonaa."**

Yaaraabcaam wuxuu ahaa ninkii weysa dahabka ah ka qotomiyey Beytel, markaa Looxa Ceebta ayuu ku qoran yahay marka la odoroso xusuusqorka Ilaah. Nebiguna wuxuu leeyahay, **"Hadalka wuxuu ka yimid Ilaah, ee aniga maahan kan sidaas leh."** Amasyaah baase leh, **"Hadalku wuxuu ka imanayaa Caamoos."**

Haddaan horey idiinku sii wado meeriska cutubka 7aad ee kitaabkii Caamoos ayaannu imminkana idiin akhriyeynaa aayadda 12-13, waxaana qorniinku leeyahay sidatan soo socota ee hoos ku xusan:

"Oo weliba Amasyaah wuxuu Caamoos ku yidhi, War waxarke yahow tag, oo dalka Yahuudah u carar, oo halkaas wax ka cun, oo halkaas wax ku sii sheeg. Laakiinse mar dambe Beytel waxba ha ku sii sheegin, waayo, waa boqorka meeshiisii qoduuska ahayd oo waa daar boqoreed."

Amasyaah wuxuu u yimid nebiga kaddib markii uu khudbaddiisii maalinnimo dhamaystay, markaasuu intuu aflagaaddeeyey si xun ula hadlay. Ha yeeshee haddaadan hadallada u fiirsan kulama noqonayso inuu aflagaaddeeyey. Balse markii aad u kuurgasho hadallada uu kula hadlayo nebiga, bilxaqiqa Camasyaah wuu caytamayaa.

Wuxuu ku yiri, **"War Waxarkayahow, tag, oo u baxso dhulka Yahuudah."** Waxay taas ka macne tahay, **"War nooga tag deegaankeenna, oo halkii aad ka timid orodoo aad."** Wuxuu kaloo Amasyaah leeyahay, **"Halkan haysku imanin, waayo waxaa ku taalla daartii boqorka."** Waxaa taasina ud hacaysaa inuu leeyahay nin wax kala garanaya maahid.

Waxaanad tahay jaahil aan garanaynin sida loo hadlo. Balse inkastoo uu ku eedaynayo in nebigu reer miyi ahaa haddana xigmadaha iyo suugaanta sarraysa ee

nebigu isticmaalayo ayaa keentay in booskiisii wadaadnimo uu khatar galo, oo wuxuuba ka baqayey in dadka ood han ay isaga raacaan, dabadeedna badarkiisii laga carreeyo. Amasyaah meel fog buu wax ka eegayaa, waayo wuu garanayaa in Nebiga hadalladiisa ay xoog badan yihiin. Wuxuuse doonayaa inuu handado, haddii kale dadka oo dhan baa garanaya waxa ay samaynayaan inay khalad yihiin, oo waxaa lagu kacayaa boqorka iyo wadaaddadiisa sharka ah ee weylaha caabuda.

Waxay la mid ahayd iyadoo qofi wax Ilaah ku saabsan kala hadlo nin kacaan ah oo guddoomiye looga dhigay mid ka mid ah golayaashii hanuuninta ee Muqdisho. Haddii nin wadaad ahi iman lahaa mid ka mid ah golayaashaa oo uu bilaabo inuu dadka wax Ilaah ku saabsan kala hadlo, sidee baa guddoomiyaha degmadu dareemi lahaa?

Haddaba Amasyaah sidaas oo kale ayuu dareemay, oo wuxuu kaloo ka cabsanayey in boqorku u caroodo isaga iyo raggii kale ee reer Beytal. Haddaan horey idiinku sii wadno meeriska cutubka ayaannu imminkana idiin akhrinaynaa aayadaha 14-15, waxaana qorniinku leeyahay sidatan:

"Markaasaa Caamoos jawaabay oo wuxuu Amasyaah ku yidhi, Anigu nebi am aan ahayn, nebi wiilkiisna ma aan ahayn, laakiinse waxaan ahaan jiray adhijir iyo mid midhaha darayga urursada, oo Rabbigu waa ii soo yeedhay anigoo adhi jiraya, markaasuu Rabbigu igu yidhi, Tag, oo dadkayga Israa'iil wax u sii sheeg."

Marka ay sidan tahay waxaannu arkaynaa sida miyirka iyo qaboobida leh ee nebigu ugu jawaabay ninkan Camasyaah ah. Wuxuu ku leeyahay Amasyaah, **"...waan garanayey inaan nebi ahayn, welibana ma aanan**

ahayn nebi wiilkiis, oo xagga waxbarashadana kama sinin. Waxaan ahaa nin reer miyi ah, oo miraha duurka ka urursada, laakiin Rabbiga ayaa i soo qaatay, oo wuxuu ii sheegay ama ii soo dhiibay waxyi. Waxaan magaalada u imidna waa inaan fuliyo wixii Ilaah dadka iigu soo dhiibay."

Haddaba, nin waliba ee Ilaah ka baqa waxaa wanaagsan inuu lahaado kalsoonidaas oo kale. Maahan in markii kuwa Ilaah neceb ay ka hor yimaadaan inuu isku dar-darsamo. Waa in si miyir leh loola hadlo kuwa af-lagaaddeeya Masiixa iyo hawlihiisa ka soconaya gobolka. Arrinka ahmiyadda leh ee ay tahay inaad is-weyddiiso intaadan hawsha Ilaah bilaabin waxaa weeye:

"Miyaa Ilaah kuu yeeray? Mise adigaa is-wada."?

Haddii Ilaah kuu yeeray cid iskaa hor-taagi karta ma lahan, si kastoo aad u hadashana waxaa u hadlaysaa Rabbigii kuu doortay waxa aad hayso ama samaynayso. Mararka qarkoodna way habboon tahay in laysku canaanto wanaagga iyo tubta toosan ee Rabbiga, oo aan la raacin, protokool iyo xeerar lafta hoose ka dhintay.

Waa in wax waliba ay noqdaan ficil, oo waxyaabaha aynu aaminsan nahayna loo arko ficil ahaan. Weli waxaan ku jirnaa dhegaystayaal meeriska cutubka 7aad aayadaha 16-17, waxaana qorniinku leeyahay sidatan:

"Haddaba bal maqal erayga Rabbiga. Adigu waxaad leedahay, Wax dadka Israa'iil ka gees ah ha sii sheegin, oo wax reer Isxaaq ka gees ahna ha ka hadlin. Haddaba Rabbigu wuxuu leeyahay, Naagtaadu dhilllo bay ku ahaan doontaa magaalada, oo wiilashaada iyo gabdhahaaguba seef bay ku dhiman

doonaan, oo dhulkaaga xadhig baa lagu qaybsan doonaa."

Waxaa farriinta nebiga aan laga waayeynin, "Haddaba bal maqal erayga **"Rabbiga."** Waxaana taas ka markhaati kacaysaa wax waliba ee nebigu ku leeyahay ninkan Amasyaah ah iyo weliba dadka Israa'iil, inay Ilaah dhankiisa ka imanayaan. Waxyaabaha uu ka sheegay ama waxyguna waa mid wareerinaya boqortooyada, oo waa war aad ugu culus iyaga, laakiin waxaa hubaal ah in waxyigu ahaan doono. Markii reer Ashuur soo galeen boqortooyada woqooyi naagihii oo dhan waxay ka dhigeen dhillooyin. Waxay kaloo laayeen wiilashii iyo gabdhihii, oo kuwii aan la layninna waxaa loo watay musaafuris.

Amasyaah Ilaah shaqo kuma lahayn, wuxuuse u adeegi jiray boqorka. In qof loo adeego, oo xoogaa dabalalo ah laga helo micna yeelan mayso, waxaa ka wanaagsan adigoo Ilaaha Baaqiga ah u shaqeeya oo Masiixiisa isku halleeya, oo caawaba isku dhiiba Sayid Ciise Masiix. Haddaan intaas uga baxno dhegaystayaal meeriska cutubkii 7aad ayaannu imminkana si dawaali ah idiinku bilaabaynaa meeriska:

CUTUBKA 8AAD EE KITAABKII

NEBI CAAMOOS.

Waxannu dhegaystayaal ku bilaabaynaa cutubka 8aad mawduuca uu ka hadlayo, waxaana weeye:

TUSNIINTII NEBI CAAMOOS LAGU TUSAY DEMBIIL AY KA

BUUXAAN MIRAH DHULKA KA BAXA

WAKHTIGA XAGAAGA.

Waa tusniintii afraad, waxaanay tusniintan ay soconaysaa ama looga hadlayaa cutubkan siddeedaad gebigiisaba. Way ahmiyad ballaaran tahay inaan haddaba garanno mcaaniga tusniinta ka dambeeya,

waayo waxay taasuu inagu caawiyi doontaa turjumada qidcooyinka soo socda ee ku qoran meelo kale oo ka mid ah kitaabka Qoduuska ah. Haddaan horey idiinku sii wadno meeriska cutubka 8aad ayaannu dhegaystayaal horey idiinku sii wadaynaa kitaabkii Caamoos 8:1, baalka 1148, waxaana qorniinku leeyahay sidatan:

"Oo haddana Sayidka Rabbiga ahu wax buu i tusay, oo waxaan arkay sambiiil midho bisilu ka buuxaan."

Haddaba wax badan ayaa laga oran karaa oo siyaabo kala duwan ayaa loo fasiran karaas waxyaabaha nebigu inoogu sheegayo mirahan dembiisha ku jira. Anigu miraha aad baan u jecelahay, oo miruhu way macaan yihiin, oo cunistoodana, keliday maahane, dad badan baa jecel. Waxaan xusuusanayaa cambihii jilib iyo kii jannaale, mooskii Soomaalita.

Qarihii gobollada dhexe ka iman jiray iyo yicibtii. Meel kastoo miruhu ka baxaan waxaan aad ugu raaxastaa miraha waddankayaga ka baxa. Waxaan aad u jecelahay dalagyada kala duwan ee miraha dhulkeenna. Balse miraha nebigu imminka ka hadlayo farrin gaar ah ayey xambaarsan yihiin.

Marka ugu horraysa, dembiil miro ka buuxaan ayaa waxay u taagan tahay wakhtiga beer-gurista. Waxaanay dembiishu inoo sheegaysaa in mirihii geedku ay dhammaanayaan marka la gaaro wakhtiga miraha geedaha laga gurayo, ama wakhtiga miruhu ay bislaanayaan. Wakhtigaas wuxuu kaloo ka micna yahay in gedka dushiisa aanu miro ku haraynin.

Waxaa kaloo dembiisha miraha ka buuxaan ay ka macne tahay in dad badan laga wadayo dunida ama ay dhimanayaan, ha u dhintaan abaaro ama ha u dhintaan dagaallo amase, cudurro ama masiibo e. Markaa

farriinta dembiisha miruhu ka buuxaan micnaheedu ma fara-yara. Haddaan horey idiinku sii wadno meeriska cutubka 8aad, aayadda 2aad ayaa waxaa qorniinku goduuska ahu leeyahay sidatan soo socota:

"Oo wuxuu igu yidhi Caamosow, maxaad aragtaa? Oo anna waxaa idhi, Waxaan arkaa sambiiil midho bisilu ka buuxaan. Markaasaa Rabbigu wuxuu igu yidi, Dadkayga Israa'iil dhammaadkoodii waa yimid, oo anigu mar dambe iyaga iska dhaafi maayo."

Waxaannu cutubka toddobaad ku soo aragnay in nebi Caamoos Ilaah u baryey dadka iyo in Ilaah kutalagalkiisii hore uu baeddelay, oo uu ka soo noqday xukunkii uu goostay. Imminkase dembiisha miruhu ka biixaan ayaa sheegaysa in xilligii beergoosadka la dhaafay. Oo waxaa soo dhammaaday oo dhulka laga gooyey boqortooyadii woqooyi ee Isaa'iil.

Xukunka imanaya ayey dembiishan miraha ka buuxaan ay u tahay astaan. maadaama beergoosadku ay ka hadasho wakhti xukun ah iyo maalinta qiyaamaha, ayaan anigu u malaynayaa in Sayidkeennu wixii uu yiri si xun loo fahmay haddaanu qofku garanin waxa beer-goosad ay ka macne tahay. Ciise Masiix ayaa wuxuu xertiisa ku yiri sida ku qoran Injiilka sida Matayos u qoray 9:37, waxaana qorniinku leeyahay sidatan:

"Markaasuu xertiisii ku yidhi, Waxaa beerta laga goynayaa way badan yihiin, shaqaalayaashuse way yar yihiin. Sidaa darteed Sayidka beergooyaska barya inuu shaqaalayaal beertiisa u soo diro." Markii uu sidaas lahaa wuxuu Masiixu ka hadlayey dhammaadka marka kutalagalkii sharcigu uu soo dhamaaday. Wuxuuna leeyahay Sayidku waxaan tegayaa

iskutallaabta, waxaase loo baahan yahay in kuwa dadka ku wacdiya oo yimaada Israa'iil.

Markii uu iskutallaabta ku dhntay, kutalagalkii hore ayaa dhammaaday waxaana bilowday mid cusub, oo waxaa la soo gaaray waaya-cusub, waana wakhtigii nimcada. Markii la gaaray wakhtigii nimcadana wuxuu dadka kula hadlay masaalkii beerrayga. Wuxuuna yiri, **"Nin beerray ah baa baxay, oo wuxuu dhulka ku beeray miro."**

Haddaba mirihii waxaa la soo baxay kuwo kale ee uu beeray kan sharka leh, wuxuuna Sayidku ku taliyey in aan miraha la jarin waayo marka ay yar yihiin ayaan dhalatada cusub la kala garanaynin. Waxaa kaloo uu dadka ku yiri, **"Taga dunida oo dhan, oo ku wacdiya Injiilka, waa farrin hddaba ay leeyihiin dadka imminka nool,"** waxaana weey in dadka lagu wacdiyo Injiilka Ciise Masiix.

Haddaan intaas ku soo ekayno barnaamijkeennii caaway ayaanu dhegaystayaal imminka quuddaraynaynaa inaad waxyaabo badan kala soo baxaysaan barnaamijka iyo inaad aqoontiinnii sare ugu qaadaysaan garashada Hadallada Ilaah. Waxaan idiin sheegayaa haddaba haddii su'aalo aad ka qabtaan waxyaabaha aad baranaysaan inaad ina soo weyddiin kartaan.

Innaguna waannu idiinka soo jawaabaynaa, iyadoo weliba su'aalihiinna aynu hawada ka sii dayn doonno, wax kastoo su'aalihiinna iyo hawaabtaba aynu hawada ka sii dayn doonno. Haatanse aynu wada-dhegaysanno qasiiddo ay inoogu luuqeeyaan hobolo masiixiyiin ah.

SONG: REEL-----CUT-----

Halkani waa TWR, Idaacadda TWR oo idinku leh Ilaah

haydin barakeeyo oo haydinku anfoco wixii aad caaway ka maqasheen barnaamijka. Waxaa barnaamij kan oo kale ah ka maqli-doontaan habeen dambe (hadahan oo kale) isla mowjaddan 25ka miterban. Haddiise aad doonaysaan inaad fikirkiinna ka dhiibateen wixii aad caaway maqasheen ayaad nagala soo xiriiri kartaan somtwr@twr.co.ke.

Waxaad kaloo waraaqaha noogu soo qortaan: P.O.Box 21514, oo koodku yahay 00505. Waxaa kaloo aan idin siin doonaa website aad ka maqashaan barnaamijyadeenna Soomaaliga ah, si kuwiinna doonaya inay koorasyo ka qaataan Baybalka ay ugu hirgasho.

SIGNATURE TUNE UP 6 AND UNDER

Halkani waa TWR oo idiin rajaynaya Habeen Baraare iyo barwaaqaba leh. Inta aynu ka gaari doonno wakhti aynu ku kulanno Barnaamij la mid ah kan caaway aad maqasheen, waxaan idinku leenahay nabadda Ciise Masiix, ha idiinku badato xagga jidhka iyo ruuxaba Aamiin